

Qof walbaa waa inuu door ka qaataa amaanka

Waxaa la ogaaday dahaarka sarta (building) ee guban karaa inuu ku jiro sartaada dibadeeda macneheeduna maaha in sartaadu ay tahay mid aan amaan ahayn. Si kasta ha ahaatee, marka dab bilawdo dahaarka guban karaa waxaa laga yaabaa in uu door ka qaato fiditaanka dabka.

Waxaa jira talaabooyin dhowr ah oo sahlan oo ay waajib tahay inaad raacdo si loo yareeyo khatarta dabka, loogana dhigo deriskaaga iyo qoyskaaga amaan. **Haddii xaallad degdeg ahi dhacdo, wac 000 (saddex eber).**



Baalkoniga sigaar ha ku cabin



Wax ha ku dubin (barbecues) baalkoniga




Ha dhigin baalkoniga haamaha (dhalooyinka) gaaska



Xaqiiji alaarmiga qaacu in aanu daboolayn ama go'nayn bil walbana la tijaabiyey. Bedel batteriga sagaalka volt ah (nine Volt batteries) sanad walba. Tixgeli ku bedelida alaarmiga qaaca kan 10 sano ah oo lithium-ka ah (10-year lithium battery).



Ka dhig baalkoniyada, meelaha la maro iyo wadooyinka qixida meel ka banaan qashinka iyo buuqsanaanta. Xaqiiji inaad leedahay qorshaha ka qixida ama ka cararida.



Ka fogey dharka iyo waxyaallaha kaleeto ugu yaraan hal mitir qaboojiyaha (air condition)